

Nabadeey waalidka ardayda dugsiga sare!

Sida aad idinkuba u ogtihiin faafida cudurka Covid-19 way ku korodhay gobolkeena oo dhamaanteen waxaa la ina faray adkeynta talooyinka inaynu ku dhaqano si loo yareeyo faafida cudurkan.

Qayb ka mid ah waxbarashadu waxay dhici doontaa iyadoo aan la joogin iskoolka

Dhanka Kungskapsförbundet waxaa qaybo ka mid ah hawshayadu u wareegi doontaa waxbarashada la qaato iyadoo aan la joogin iskoolka. Siyaabo kala duwan ayay u eekaan doontaa dhinaca dugsiyadayada sare maadaama dhismayaasha iyo fursada in la kala durko masaafo ahaan ay ku kala duwanyihiin dhismayaasha iskoolada laakiin dhamaan waxaa la yeelan doonaa kooxo waxbarasho oo wax barta iyagoo jooga gurigooda. Ardayda waxbarasho ku qaadanaysa iskoolka waxay fursad weyn u heli doonaan inay kala durkaan masaafo ahaan oo ciriiriga meelaha uu ka jiro wuu ka yaraan doonaa iskooladan.

Wakhtiga maanta la joogo ma u eeka inay ahaan doonto sidii gu’gii markii ardayda oo dhan ay ku khasbanaayeen inay waxbarashada ku qaataan guriga. Iskoolku wuu furanyahay oo qaar badan waxay iskoolka u iman doonaan si caadi ah.

Go’aankan wuxuu ansax yahay ilaa iyo 19 Noofambar oo ay dhici karto in la sii dheereeyo.

Warbixin dheeraad ah waxaad ka helaysaa la taliyayaasha ardayda iyo ItsLearning

Haddii ilmahaagu ka mid yahay dadka waxbarashada qaadanaya iyagoo aan joogin iskoolka markaas waxaad macluumaadka ka helaysaa la taliyayaasha iyo dhanka Itslearning.

Waxaanu haysanaa waayo-aragnimadi aanu helnay wakhtigi gu’ga ee waxbarashada iyadoo aan la joogin goobta oo taas ayaanu u isticmaali doonaa qorshahayaga si ardayda loo siiyo fursada ugu fiican si ay ugu guuleystaan waxbarashadooda. Ma ku xirna haddii ay joogaan iskoolka ama iyagoo aan joogin iskoolka ay si buuxda wax u baranayaan ama qaybo ka mid ah maalintii ee iskoolka.

Adigu waxaad ilmahaagu ku caawin kartaa inaad:

- Xusuusiso in ay iyagu ka warhayaan macluumaadka iyagoo akhrinaya Itslearning iyo bogga intarnatka ee iskoolka maalin kasta.
- Ay guriga u qaataan alaabtooda waxbarasho (buugta, kombiyuutarada, xariga jaarjarka) maalin kasta haddii ay waxbarasha ku leeyihiin iskoolka.
- Xusuusiso inay jirto taageero inay heli karaan haddii wax dhib ama kadeed ku yihiin. Kooxdayada caafimaadka ardayda waxay u joogaan xitaa qofka wax baranaya iyadoo aan la joogin iskoolka.
- Waxaa jirta caawimaad la helo haddii wax xumaadaan dhanka qalabka kombiyuutarada ama wax kale – shaqaalahayaga xagga kombiyuutarada waxay diyaar u yihiin iyaga.

Waanu ognahay in idinkuba aad ogtihiin

Xiritaankii iskoolada ee gu'gii waxaa ka muuqatay in iskoolku uu goob muhiim ah u yahay dhamaan ardayda. Si wadajir ah ayaynu isaga caawinaynaa inay furnaadaan.

Markaynu qaadno talaabooyinkan lagama maarmaanka ah ee samayno wax kasta oo aynu awoodno si loo yareeyo faafida cudurkan, waxaanu rajaynaynaa in ardaydeenu ay sii wadan doonaan inay imaadaan iskoolka.

Waanu ognahay inaad horeyba u ogeydeen, laakiin haddana waanu idin xusuusinaynaa:

- Guriga joog haddii aad leedahay xitaa wax yar oo calaamado xanuun ah. Baaritaan iska qaad.
- Gacmahaaga dhaq.
- Baaskiil ama lug ku imo iskoolka haddii ay suurtagal tahay.
- Dadka kale ka durug masaafu ahaan!

Miyaad haysaa su'aalo ama jiraan waxyaabo aad isweydiineyso

Adiga waxaa lagugu soo dhawaynayaa inaad nagala soo xiriirto ii-maylka: kansli@kunskapsforbundet.se

Halkan ka akhri wixi dheeraad ah ee ku saabsan talooyinka guud ee la adkeeyay iyo kuwa guud ahaanba:

<https://www.folkhalsomyndigheten.se/nyheter-och-press/nyhetsarkiv/2020/oktober/beslut-om-skarpta-allmanna-rad-i-stockholms-lan-vastra-gotalands-lan-och-ostergotlands-lan/>

Salaan diiran,
Kunskapsförbundets ledning